

Waa salaaman tahay,



Waxaan baadi doonayna adiga oo mudnaan siiya xorriyada, sinnaanta iyo midnimada. Su'aashu waxay tahay, haddii aad doonayso in aad ka qaybqaadato suurtagelinta sare u qaadida heerka cadaalada ee dalka Iswiidan? Wadajir waxaan dhisi karna...

...aayatiinta xisbiga social-demokratiga waxaan hab xoog leh ugu hortegi doona siyaasadda maalqabeenka dhexe. Xubin ahaan xisbiga ku soo-dhawoow – warbixin dheeraad ah halkan ka akhriso socialdemokraterna.se Wax iska-bedel wadajir ayaan u suurtagelin karna!

Mona Sahlström



XISBIGA SOCIALDEMOKRATIGA WAA DHAQDHAQAAQ XORRRIYAD KU SALAYSAN. Siyaasadayda waxay ku salaysan tahay in qof kasta u helo fursad u ku doorto qaabka nooloshiisa u gaarka ah – shaqaysto, qoys ku dhisto, ama uu ku helo fursada waxbarashdii u ku riyoon jiray – dhaqangeliyo tacaburkii noloshiisaa.

Xorriyada dhabta ah waxay keenta sinnaanshada. Haddii sare ay u kacdo tirada kala fogaanshada dadyoowga saboolka ah iyo kuwa maalqabeenta ah, dadkuna falal takoor ku salaysan loo geeysto waxaa xaladaas hoos u dhacaayo heerka xorriyada. Hawlgalka siyaasadayda ugu muhimsan, ayaa wuxuu yahay in dadyoowga dhammaantood, iyado cidna laga reebin, ay helaan fursad ay ku galaan socdaalka noloshooda wanaagsan. Ma ka heshay siyaasadayda?



Sidee ayaan u hawlgalna?

ANAGO KU TIIRSAN DOONO KORNIINKA DHAQAALAHA CULUS, iyo awood heer sare ah, ayaa waxaan doonayna in an hoos u dhigno heerka kala fogaanshada heerarka bulshada, dib u celinno heerarka daqliga an is lahayn, oona sare u qaadno heerka barwaaqada. Waa arrin muruqgelin ku saabsan sidii boosaska shaqada loo kordhin laha, qofka dhaqaale ahaan an isku filnayn waa qof an xorriyad haysan.

Waa arrin ku saabsan muruqgelinta daryeelka caafimaadka iyo xannaanada waayeelka, taaso suurtagelin doonto in qofna u san ka walwalin helida taa-geerada bulshada maalinta uu baahdo.

Waa arrin ku saabsan dhisida caymiska badbaadigelinta, taaso suurtegelin doonto in qofka anaga naga mid ah u daahid la'aan u helo taageero buuxda oo uga kabsado haddii shaqo la'aan ay ku dhacdo ama u xannuunsado. Waa arrin ku saabsan xilqaadka ummadda oo idil, waxaana lagu dhaqan gelin kara iyado la adeegsado warqadda canshuurta (skattesedeln). Cidlaynta qof anaga naga mid ah qofna faa'iido ugu ma jirto. Midaynta jiilalka soo socda iyo ummada adduunwaynaha ku nool, waxay nagu aadinaysa in an hab culus ugu hawlgalno arrimaha cimilada ku saabsan iyo hawlaha Qaramada Midoobay. Ma doonaysa in aad naga mid noqoto oo aad siyaasadayda saamayn ku yeelato?



Maxay ku saabsan tahay?

XORRRIYADA, SINNAANSHADA IYO MIDNIMADA WAA HORYAALLO aad u fican oo ah hogaanka xisbiga socialdemokratiga. Siyaasadayda hab joogto ah ayaa u haggaa-jin doona waxna loogu beddeli doona.

Haddii sare ay u kacdo tirada xubnaha, kuwaso xisbiga ku soo biiriyo fikrado iyo khibrado cusub, xaaladaas waxaa la heleyaa fursad hab fudud loogu soo goggol-dhigo siyaasadda mustaqbilka.

Xubnaha xisbigayga siyaabo kala duwan ayee u hawlgeli karaan. Qaar xubnaha kamid ah waxay ka qaybgalaan kulan kasta, kuwa kalena marmar un. Waxaa jiro qaar hab firfircoon ugu hawlgala Internetka, kuwa kalena goobaha laga shaqeyo. Dhammaan waxay hawlaha xisbiga ugu qaybqaadan karaan sida iyaga ula habboon. Had iyo jeer gacan furan ayaa xisbiga loogu soo dhaweenaya!

Xafiiska xisbiga degmadaada u dhow ayaa warbixin dheeraad ah ku siin karo. Goobo tiro badan oo dalka ku yaala waxaa laga qabanqaabiya tababarro ama dhaqdhaqaaqida gaar ahaan loogu talagalay xubnaha cusub.



Ma doonaysa in aad ka qaybqaadato?



Arrimaha aad xiisaysa waa kuwee?

IYADO FIIROGAAR AH AN LA SIIN DOONIN HEERKA DADAALKAAGA AYAA, waxaa laga ballan qaadayaa in aad siyaasad ka doodi doonto, waxaana la kulmi doonta dad cusub, waana ka heli doonta! Haddii waxyaalaha qaarkood aad gaar ahaan u xiiseeyso, waxaa dhici karto in u kugu habboon yahay mid kamid ah ururrada xisbiga, kuwaas kamid ah sida kuwa da'yarta xisbiga ay isugu tagaan (SSU), kuwa kriishtaanka waxay isugu tagaan (Broderskap), ardayda xisbiga socialdemokratiga waxay isugu tagaan (S-studenter). Ururka isbahaysiga dumarka ee xisbiga waa (S-kvinnor).

Na soo raadraac, saanta soo qaad. Xubin xisbiga ka noqo.

Iska diiwangeli bogga Internetka socialdemokraterna.se ama buuxi jeexa warqadda!